

Soo wac Khadka Caawinta Xad-gudubka Guriga ee Sheffield 0808 808 2241 haddii:

- qof kuu dhow guriga kugu xad-gudbo
- ka ladnaaneyso xad-gudub guri iyo u baahan tahay taageerid
- ka wel-welsan tahay xubin qoys ama saaxib iyo u baahan tahay inaad wax ka badan ogaato
- aad tahay xirfadle rabo inuu helo macluumaad uu ku taageero macmiiladiisa
- adeegyada waxaa heli karo dumar iyo rag

Soo wac Khadka caawinta sidii aad u hesho talo, taageerid, meel ammaan ah aad joogto ama haddii aad uu baahan tahay inaad qof kala hadasho wixii kugu dhaco. Khadka waa uu bilaash telefoonka caadiga ah iyo badanaa shirkadaha tusaale ahaan Virgin, O2, T-Mobile, Orange, Vodafone iyo 3.

Taageerida Luqada

Haddii aad wacdo Khadka caawinta iyo ku hadli weyno luqaddaada, waxaan kuu qaab-qaabin doonaa turjubaan si aan kuula hadalno.

Waa maxay xad-gudubka guriga?

Waa xad-gudub walba ee ka dhax dhaco xiriir shakhsi ama qoys. Wuxuuna ahaan karaa xad-gudub jireed, shucuureed, galmeed iyo maaliyadeed, sidoo kaleba waxaa xad-gudub loo arkaa arooska qasabka ah iyo rabshada ku salaysan 'Sharaf Dhowrka. Wuxuu ku dhici karaa lammaane kala jinsi iyo kuwa isku jinsiga ah, dhaqan walba ka socdo iyo da' walba. Qofka xad-gudubka sameeyo wuxuu ahaan karaa lammaanahaada, lammaanahaada horey ama xubin ka mid ah qoyska.

Xad-gudubka guriga wuxuu ku saabsan yahay xoog-sheegasho iyo xukun. Si dhif ah ayuu hal mar kaliya u dhacaa, wuxuuna sii xumaada waqti ka dib. Haddii lagu xad-gudbo, gardarrada adiga ma lihid iyo waxaad xaq u leedahay in si ka fiican lagula dhaqmo.

Waayo shaqaaleyaasha khadka caawinta?

Shaqaaleyaasha Khadka caawinta waa shaqaale ku takhasuusan xad-gudubka guriga, oo og inuu dhib yahay in laga hadlo xad-gudubka iyo inaad ahaan kartid qof ku wareeey iyo la wel-welsan yahay wixii kugu dhacey. Way ku dhegeysan karaan iyo waxay kuu sheegi karaan xulashooyinka aad heli kartid. Waxay kugu caawin doonaan sameynta **xulashooyinkaaga**. Dhammaan shaqaalaha khadka caawinta waxay heleen tababar si ay u gartaan mawduucyada dhaqanada iyo jaaliyadaha kala duwan iyo waxba ma qaban doonaa (iyo qofna uma sheegi doonaan) arintaada haddii uu halis dheeraad kuu noqon karo.

Adeegyada Xad-gudubka Guriga ee Sheffield

Adeegyada Xad-gudubka Guriga ee Sheffield waxuu ka kooban yahay khad caawin, adeeg jaaliyadda garabsiiyo, Adeegga Madax-bannaan ee Talo-siinta Xad-gudubka

Guriga ee dadka ku jiro halis wayn in dhaawac wayn ka gaaro xad-gudbka guriga iyo hoyga haweenka.

Miyuu kani yahay adeeg sir ah?

Khadka Caawinta Xad-gudubka Guriga ee Sheffield si sir ah ayuu ku hayn doonaa wixii aad u sheegto iyo waxaan xushmeyn doonnaa baahida aad u leedahay ammaankaaga.

Haddii ay jiraan arrimo si deg-deg ah u halis geliya ammaankaaga, midka qof kale wayn ama cunug ama dhallinyaro, waxaa waajib nagu ah inaan macluumaad bixinno, waxaan isku dayi doonnaa inaan ku ogeysiinno markii uu suurtoagal yahay. Haddii aan kugu caawino inaad hesho adeeg kale waxaan ka codsan doonnaa fasax aan macluumaadkaaga u gudbinno adeeggaas. Si aan kuu siinno adeegga ugu fiican aan awoodno, waxaan keydin doonnaa diiwaanka waxyaabaha aan ka hadalney si aan diyaar kuu noqono haddii aad u baahato inaad mar labaad ina soo wacdo.